


Xukuumada Fiktooriya Istaraatiijiyadeeda Ka-hortagga Dhibaataaynta Dadka Waayeelka ah



Waa maxay dhibaataaynta waayeelka?

Dhibaataaynta waayeelku waa ficil kasta oo cilaqaadka aaminaada kaas oo u keena waxyeelo qof waayeel ah. Waxyeeladaas waxay noqon kartaa mid jireed, dhaqaale, maskaxeed ama galmoood waxaana ka mid noqon kara si xun ula dhaqmid iyo dayacaad.

Caawin inaad garato waxyeellada qofka waayeelka ah

Arrintaani adiga ma ku khusaysaa, amase qof aad taqaan?

- La iima ogola inaan arko ama la hadlo saaxiibada
- Qof qoyskayga ka mid ah ayaa I cabsi gelinaya
- Carruurtayda ayaa qaadanaysa lacagtayda iyaga oo aan I weydiin
- Go'aama muhiima ayaa la ii sameeyey anniga oo aan ogolaansho bixin

Hadii taasi adiga ku sharxayso ama qof aad taqaan, waxay noqon kartaa waxyeellaynta qof waayeel ah, si xun ula dhaqmid iyo dayacaad.

Ku dhibaataaynta dhaqaalaha

Ku dhibaataaynta dhaqaaluhu waa mid ka mid ah noocya badan oo dhibaataayn ah waxaana badanaa raaca noocya kale oo dhibaataayn ah. Ku dhibaataaynta dhaqaale waa sharci daro ama si xun u isticmaalid qof waayeela dhaqaalihiiisa, hantidiisa ama xoolihiiisa.

Calaamadaha ku dhibaataaynta dhaqaalaha waa:


- Akoontiga bangiga oo si xun ama aan caadi ah wax looga saaro,
- Awood xeer ilaaliye oo la bixiyey, ama wax ka bedelid dhow ama abuurista ama samaynta dhaxal, marka qofku aanu awoodin inuu go'aan sameeyo;

- Dareen laga qabi karo daryeelaha taas oo lacag badan lagu kharajgareeyey daryeelka qofka waayeelka ah;
- Biilal badan oo aan la bixin, ijaarka oo waqtigiisii dhaafa, marka ay ahayd in qof ka bixiyey biilasha qof waayeella oo ku tiirsan;
- Ku meelayn guryaha dadka lagu xanaaneeyo kuwaas oo aan ku haboonayn qofku wuxuu rabo;
- Maqnaanshaha waxyaallaha qofka muhiimka u ah, sida telefshanka, waxyaallaha la isku qurxiyo, dhar ku haboon, kuwaas oo qofka waayeelka ahi awoodi karo;
- Lumitaanka waxyaalla qofku lahaa sida farshaxan, agabka silfarka ka samaysan, ama dahab;
- Ka goynta qofka waayeelka ah saaxiibada iyo xubnaha qoyska, taas oo keenaysa in qof kale si buuxda u kantaroollo qofka waayeelka ah dhaqaalihiiisa, hantidiisa iyo/ama xoolihiiisa.

Ku dhibaataaynta dhaqaaluhu waxay kaloo u dhici kartaa si dadban oo hagaradaamo ah, iyada oo qofka weyn si joogto ah dhibaateeyuhu uga codsado dhaqaale dabadeedna qofku "is dhiibo si uu uga nabadgalo".

Xuquuq. Ixtiraam. Aaminaad.

Xukuumada Fiktooriya Istaraatiijiyadeeda Ka-hortagga
Dhibaataaynta Dadka Waayeelka ah



Maxaa dhacaya hadii ku dhibaataayn dhaqaale laga shakiyo?

Waa muhiim in dadka waayeelka ah, ay fahmaan xaqooda iyo awoodaha wixii la xiriira dhaqaalahooda, xoollo iyo hanti. Sidoo kale waa muhiim in dadku raadiyaan talo haddii qof ay ogyihiin lagu hayo dhibaataayn.

Seniors Rights Victoria waa khad caawimo iyo adeeg xawilaadeed oo lacag la'aana waxaana kharajkiisa bixisay xukuumada. Haddii aad aaminsan tahay inay ku haysato ama aad khatar ugu jirto dhibaataayn dhaqaale, *Seniors Rights Victoria* ayaa ku caawin karta. Wac 1300 368 821 inta u dhexaysa 10subaxii ilaa 5ta galabtii ama booqo

www.seniorsrights.org.au

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Istaraatiijiyada Ka-hortagga Dhibaataaynta Dadka Waayeelka ah ee Xukuumada Fiktooriya:

Xafiiska dadka reer Fiktooriya ee waayeelka ah (Office of Senior Victorians)

GPO Box 2392V

Melbourne VIC 3001

Tel: (03) 9208 3333

Fakis: (03) 9208 3870

Email: enquiries@seniors.vic.gov.au

www.seniors.vic.gov.au

Oktober 2010